IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـة الجريـدة

Sannadka 13aad Muqdisho 2 Maajo 1985 L. 5

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — BUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 14 ee 15 Maarso 1985 Xeerka qaabka dhisma ha Xarunta Wasaaradda Arr, Gudaha Bog, 301

XEER WAS. GAASHAANDHIGGA, L. 5 ee 16 Abr, 1985 Xeer Nidaamiyaha ee Xeerka Baxsiga iyo hub ururinta » 314

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIGA L. 6 ee 16 Abr, 1985 magacaabid Kaaliye » 315

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY, & WIXII LA MID AH

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L, 14 ee 15 Marso 1985 Xeerka qod, Dhismaha Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha,—

MADAXWEYNAHA J,D,S,

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS, qodobka 82/14;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeeyey kuna saabsanaa nidaamka dawladda (Ordinamento Governo),

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 30 ee 30,7,84 kuna saabsan dhismaha Was, Arr, gudaha

ISAGOO ARKAY: Xeerka lambar 316 ee 17,12,62 kuna saabsan nidaamka xafiisyada dhexe ee dawladda (Organisation of Government),

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha,—

ISAGOO AQOONSADAY: In loo baahan yahay in dib loo habeeyo dhismaha cusub ee xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha,—

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 1aad

Wasaaradda Arrimiha Gudaha iyadoo raacaysa awaamiirta iyo talooyinka Wasiirka Was, Arri, Gudaha waxay ku shaqayn doontaa hawlaha loogu xilsaaray sharciga lambar 30, ee 30,7,84 ee ku saabsan dhismaha Wasaaradda iyo hawlaha kale oo sharciga iyo xeerarku u xilsaarayaan,—

Qod. 2aad

1, Xoghayaha Joogtada ah iyo Agaasimayaasha Guud waxay noqon karaan Saraakiil ka tirsan shaqaalaha maamulka ee Dawladda,—

2, Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaraddu wuxuu ku camal fali doonaa qodobka 3aad ee xeerka dhismaha maamulka dawladda dhexe (qod.3aad n 316 del 17.12.62).

Wasaaraddu waxay yeelaneysaa 7 Agaasin Guud. Waaxyo iyo Qaybo,—

QODOBKA 3AAD

1, Agaasinka Guud Nabadgelyada,
2, Agaasinka Guud Maamulka Gobollada iyo Dawladda Hoose,—

3, Agaasinka Guud Horumarinta Miyiga iyo Qorsheynta,—

4, Agaasinka Guud Maamulka Deeqaha iyo Aafooyinka,—

5, Agaasinka Guud Shaqaalaha,—

6, Agaasinka Guud Xiriirka Dibadda iyo Bulshada

7, Agaasinka Guud Maamulka iyo Hantidhowrka Gudaha,

Qod. 4aad

Agaasinka Guud Nabadgelyada wuxuu mas'uul ka noqon doonaa hawlaha ku saabsan,—

1, Sugidda Nabadgelyada,—
2, Xasiloonida Guud ee dalka Gudihiisa,
3, Arrimaha saameeya xad-beenaadka,
4, Fasaxidda haysashada Hubka,
5, Taakuleynta Ciidamada ka daafacay qaranka Weerarka dibedda,—

6, Kormeerka iyo ilaalinta xabsiyada dalka,—
7, Kormeerka iyo ilaalinta xarumaha dhallinta Kacaanka,

8, Agaasinka Guud wuxuu yeelanayaa saddex Waaxood iyo shan qaybood oo kala ah:

b) Waaxda Xasiloonida Guud,—

— Qaybta Hawlaha Nabadgelyada,
— Qaybta Hubka iyo xad-beenadka,

t) Waaxda Arrimaha Ciidamada,—

— Qaybta Xabsiyada,—
— Qaybta Xarumaha dhallinta Kacaanka,
— Qaybta Taakuleynta Ciidamada,

j) Waaxda Jinsiyadda iyo Socdaalka,—

— Qaybta Jinsiyadda iyo Tir/ta Dadweynaha,
— Qeybta Socdaalka,—

Qod. 5aad

Agaasinka Guud Maamulka Gobollada iyo Dawladaha Hoose wuxuu fulinayaa hawlaha ku saabsan,

1.— Habeynta Soohdimaha Gobollada iyo Deg/nka,

2, Isuduwidda War'bixinada & Go'aanada Gob/da,

3, Wax ka qabadka dhibaatooyinka dhulka iyo Beeraha,—

4. Habeynta iyo isuduwidda Miisaaniyadda Dawladda Hoose,—

5, La socodka Canshuuraha Dawladda Hoose,

6, Ilaalinta Dakhliga iyo kharajka Da/da Hoose, Hoose,—

7, Maamulka korontada ee Degmooyinka,

8, Maamulka hawlaha (Anagrafe) ee dhalashada dhimashada, Nikaaxa, furidda iyo tirakoobka,

9, Maamulka iyo Xisaabaadka laamaha Ganacsiga Degmooyinka oo ka kooban cunno daawo dad iyo Xoolaha iyo wixii kale ee ganacsi oo ku soo biira dawladaha

10, Xiriirka ka dhexeeya dawladaha Hoose iyo Wasaaradaha dhinaca khuseeya hawlaha kor ku dhigan,

11, Talo bixinta habka dhismaha magaalooyinka &

12, Agaasinkaas Guud wuxuu yeelanayaa laba Waa xood iyo shan qaybood oo kala ah,—

b) Waaxda isuduwidda Gobollada:
— Qeybta warbixinada iyo go'aanada,
— Qeybta dhibaatooyinka dhulka beeraha iyo soohdimaha,—

t) Waaxda Dawladaha Hoose:
— Qaybta ilaalinta Dakhliga kharashaka iyo Miisaaniyadda,—
— Qaybta Ganacsatada iyo Korontada,
— Qaybta la socodka canshuuraha iyo habka Dhismaha magaalooyinka,—

Qodobka 6aad

Agaasinka Guud horumarinta Miyiga iyo qorsheyn ta wuxuu fulinayaa hawlaha soo socda:

1, Fulinta barnaamijka horumarinta Miyiga,

2, La socodka iyo daraasi ka sameynta baahida horumarinta ee dhaqaalaha Gobollada & Degmooyinka

3, Sameynta iyo la socodka qorshaha iyo tirakoob ta mashaariicda kala duwan lana xiriirta horumarinta Miyiga iyo magaaladaba,

4, La socodka iyo talo ka bixin maamulka iskaa wax u qabso,—

5, Abaabulka iyo sameynta naqshadaha mashaariicda iyo degsiimada (Piano regolatorio),

6, Diyaarinta Dokumeetiga mashaariicda horuma rinta Gobollada,—

7, Wada shaqaynta Hay'adaha qorsheynta Qar/ka

8, Isuduwidda la socodka mashaariicda Hay'adaha Caalamiga iyo kuwa samafalka ka hirgelinayaan horumarinta Gobollada iyo Degmooyinka,

9, Maamulka Rugta kutubta Wasaaradda,

10, Maamulka Carwooyinka Gobollada,

11, Agaasinkaas Guud wuxuu yeelanayaa saddex Waaxood iyo todoba qaybood oo kala ah:

b) Waaxda Horumarinta Miyiga,
— Qaybta Iskaa wax u qabso,—
— Qaybta fulinta barnaamijka horumarinta Miyiga
— Qaybta Isuduwidda & la socodka Hay'da ajna/ga

t) Waaxda Qorsheynta:
— Qaybta diyaarinta dokumentiga mashaariicda Horumarinta,—
— Qaybta Kormeerka & tirakoobta mashaariicda,

j) Waaxda Farsamada:
— Qaybta daraasad u sameynta baahida horumarinta Gobollada iyo Degmooyinka,
— Qaybta sameynta naqshadaha,

Qodobka 7aad

Agaasinka Guud Maamulka Deeqaha iyo Aafooyinka wuxuu fulinayaa hawlaha hoos ku qoran:

1, Isuduwidda qorshaha barnaamijka deeqaha ad duunka ee horumarinta bulshada isagoo Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale xiriirinaya,

2, Keydinta iyo qeybinta Deeqaha,

3, Kormeerka Mashaariicda Horumarinta ee lagu fulinayo deeqaha,

4, Taakuleynta Iskaashatooyinka dhinaca deeqaha isagoo la kaashanaya habka Hay'adaha ku shaqada leh

5, Isudiyaarinta iyo wax ka qabashada arrimaha la xiriira Aafooyinka la soo gudboonaada bulshada,

6, Soo ururinta iyo keydinta qalabka Aafooyinka wax laga qaban karo,—

7, La socodka xilliyada roobabka iyo jiilaalada isa

goo kaashanaya Hay'adaha ku shaqada leh,

8, Ururinta warbixinnda Aafooyinka,

9 Agaasinkaas Guud wuxuu yeelanayaa saddex Waaxood iyo Lix Qeybood oo kala ah:

b) Waaxda Deeqaha:
— Qeybta Isuduwidda barnaamijka Deeqaha,
— Qaqbta soo dejinta,

t) Waaxda Kaydinta,
— Qaybta qaybinta iyo warbixinnada deeqaha,
— Qaybta Kormeerka iyo xisaabaadka,

j) Waaxda Aafooyinka:
— Qeybta ka hortaga Aafooyinka,
— Qeybta xog-ururinta Aafooyinka,

Qodobka 8aad

Agaasinka Guud ee Shaqaalaha wuxuu fulinayaa hawlaha soo socda:—

1, Habeynta iyo Isuduwidda Maamulka Shaqaalaha Dawladda Dhexe,

2, Habeynta iyo Isuduwidda Maamulka Shaqaalaha Dawladda Hoose,

3, Xannaanada Shaqaalaha iyo daryeelkooda,

4, Talo ka bixinta Dallacaadaha Shaqaalaha iyo Asluubtooda,

5, Talo ka bixinta kala beddelan Shaqaalaha iyo Fasaxooda,

6, Diyaarinta iyo habeynta xogwarran sanadedka Shaqaalaha iyo kan gaar ahaaneed,

7, Maamulka tababarada Shaqaalaha,

8, Keydinta iyo habeynta Galalka Shaqaalaha,

9, Agaasinkaas Guud wuxuu yeelanayaa laba Waaxood iyo 4 Qeybood oo kala ah:—

b) Waaxda Maamulka Shaqaalaha Dawladda Dhexe.

— Qeybta tababarada iyo caabka.
— Qeybta Qiimeynta Warbixinnada.

t) Waaxda Shaqaalaha Dawladaha Hoose.
— Qeybta kala beddelka iyo fasaxyada.
— Qeybta keydinta iyo habeynta galalka.
— Qeybta tababarada Shaqaalaha Dawladaha Hose

Qodobka 9aad

Agaasinka Guud Xiriirka Dibedda iyo Bushada wu xuu fulinayaa hawlaha soo socda:—

1. Xoojinta iyo Horumarinta Xiriirka ka dhexeeya Wasaaradda iyo Hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa heer Gobol iyo heshiisyada Wasaaraddu la gasho.

2. Maamulidda xiriirka dibedda ee Wasaaraddu la yeelaneyso dalalka kale.

3. Taabagelinta heshiisyadii mataaneynta Dawladaha Hoose la galeen Dawladaha Hoose ee adduunka qaarkood iyo raadin Mataaneyn kuwo kale.

4. Abaabul iyo taabagelin wargeysyo lagu faafiyo warar ka muhiimka ah ee saameyn kara dalka.

5. La socodka iyo adkeynta ururada Dawladaha Hoose ee Carabta ay xubin ka yihiin Dawladaha Hoose qaarkood;

6. La socodka iyo isuduwidda shirarka Wasaaradaha Arrimaha Gudaha;

7. La socodka iyo wax ka qabashada shirarka Caidamada Nabadgelyada Dawladaha Carabta iyo faa'iido ka gaaridooda;

8. La socodka horumarka hiddaha iyo dhaqanka bulshada;

9. Lasocodka iyo wax ka qabadka maamulka Dugsiyada Shaqaalaha;

10. La socodka iyo wax ka qabadka Xannaanada Carruurta iyo Hooyada;

11. La socodka waxbarashada Hoose/Dhexe ee Gobollada iyo Degmooyinka;

12. La socodka caafimaadka asaasiga iyo gurmadka degdegga ah.

13. Agaasinkaas Guud, wuxuu yeelanayaa laba Waaxood iyo Ix Qeybood oo kala ah:

b) WAAXDA XIRIIRKA DIBEDDA:

— Qeybta xiriirka Hay'adaha Dibedda;
— Qeybta maamulka heshiisyada mataaneynta Dawladaha Hoose la galaan Dawlado kale.
— Qeybta soo saaridda wargeysyada.
— Qeybta la socodka horumarka hiddaha iyo dhaqanka;

c) WAAXDA BULSHADA:

— Qeybta maamulka dugsiyada dhaqaalaha iyo xannaanada carruurta iyo hooyada (M.C.H.);
— Qeybta la socodka waxbarashada Hoose/Dhexe, caafimaadka asaasiga iyo gurmadka deg-degga.

Qod. 10aad

Agaasinka Guud Miisaaniyadda iyo Hantidhawrka Gudaha, wuxuu fulinayaa hawlaha Wasaaradda loo xilsaaray oo ku saabsan;

1. Habeynta iyo diyaarinta Miisaaniyadda Wasaaradda ee caadiga ah iyo tan horumarinta ee loogu tala galay Gobollada;

2. Maamulka iyo ku dhaqanka xisaabaadka Miisaaniyadda;

3. Nidaaminta iyo isuduwidda hawlaha xafiisyada iyo gaadiidka xarunta;

4. Kormeerka xisaabaadka guud iyo mid gaar ahaaneed iyo hantida maguurtada iyo guurtada, si loo hubiyo in Gobollada iyo Degmooyinka ay fuliyaan sharciyada iyo twareegtooyinka hab-xisaabeedka dalka;

5. Toosinta habka xisaabaadka meeshii u baahan si loo xaqiijiyo hantida ummadda Soomaaliyeed;

6. Ugu yaraan 2 jeer sanadkii waa in Waaxda Hantidhowrku kormeerto Gobol walba.

7. Diiwaan gelinta iyo tirakoobidda hantida maguurtada iyo guurtada Xarunta iyo Gobollada.

8. Agaasinkaas Guud, wuxuu yeelanayaa laba Waaxood iyo shan Qeybood oo kala ah:

b) WAAXDA MIISAANIYADDA:

— Qeybta Maamulka iyo ku dhaqanka xisaabaadka Miisaaniyadda;
— Qeybta habeynta xafiisyada iyo gaadiidka.

t) WAAXDA HANTIDHOWRKA GUDAHA:

— Qeybta Kormeerka Guud, gaar ahaaneed iyo toosinta habka Xisaabdaaka.
— Qeybta Diiwaangelinta iyo tirakoobka hantida maguurtada iyo guurtada ee xarunta dhexe, Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod. 11aad

Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda waxaa toos u hoos imaanaya Qeybha soo socda:
— Qeybta Arkiifiyada caadiga ah;
— Qeybta Arkiifiyada sirta.

Qod. 12aad

Wixii Xeer ah ee ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan waa la tirtiray.

Qod. 13aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saarayaa Taafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15ka Maarso 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WAS. GAASHAANDHIGGA, L. 5 ee 16 Abr. 1985 Xeer Nidaamiyaha ee Xeerka Basiga iyo Hub ururinta

W A S I I R K U

MARKUU ARKAY: Xeerka Gaarka ah ee Madaxweynaha J.D.S. L. 11 ee 20 Maarso 1985 oo lagu soo saaray Faafinta Rasmiga ah ee 25 Maarso 1985 L. 2 r 3;

MARKUU GARTAY: In ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo Xeer Nidaamiye lagu hirgeliyo laguna fuliyo Xeerka Gaarka ah ee kor ku tilmaaman;

ISAGOO CUSKANAYA: Awcodda ku xusan Qod. 70aad Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada ee waqtiga Nabadda iyo Dagaalka ee lala akhriyo Qod. 5aad ee Xeerka kor lagu soo sheegay.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Nidaamiyaha soo socda

Qod. 1aad

MUDDADA NOOCYADA BAXSASHADA

Iyadoo ay sideeda u taagan tahay ciqaabta DILKA AH ee noocyada baxsashada ee ku taal Qod. 1aad ee Xeerka la hadal hayo, gelitaanka dembiyadooda, waxaa la raacayaa muddooyinka soo socda:

1) 45 (Afartan iyo Shan) casho dhammaan noocyada baxsashada ee la galay ka hor intaanu dhaqan gelin Xeerka lambarkiisu yahay 11 ee 20 Maarso 1985, iyagoo ka bilaabanaya taariikhda la faafiyey;

2) 7 (Toddoba) casho dembiga baxsashada ee ku taal Qod. 132 X.C.C.N. oo la galay ka hor intaanu dhaqan gelin Xeer L. 11 ee 20-3-1985;

Qod 2aad

3) Dhammaan dembiyada kale ee baxsashada waxaa la raacayaa muddooyinka iyo hababka ku qoran madaxa VIII (8°) Qaybta I°, IIo iyo IIIo khaas ahaan laga bilaabo Qod. 328 ilaa 341 Xeerka Ciqaabta Ciidammada Dagaalka (X.C.C.D.);

RAADINTA IYO QABASHADA BAXSADEYAASHA

1) Marka ay dhammaato muddada ku tilmaaman Qod. 1aad ee Dekreetadan, raadinta iyo qabashada dadka baxsiga ah, waxaa mas'uul ka ah Colka uu ka baxsaday iyagoo raadraacooda si isdabajoog ah u wadi doono ilaa ay ka soo qabtaan oo ay gacanta ka saaraan Hay'adaha Garsoorka Ciidammada Qalabka Sida, ama ay u caddeeyaan in baxsaduhu uusan ku sugnayn Dalka J.D.S., iyadoo mas'uuliyiinta Colka looga digayo wixii ciqaab ah ee kaga imaan kara gudashada Xilkaas;

2) Mas'uuliyiintaas, marka ay gudanayaan waajibaadkooda, waxay la kaashan karaan, haddii ay u baahdaan nooc kasta oo ka mid ah Ciidammada Qalabka Sida, Saldhigyada Booliska iyo Hay'adaha Nabadgelyada Gudaha.

Qod. 3aad

TEBIN BAXSI

1) Taliyeyaasha C.Q.S., Taliyeyaasha nooc Ciidan, Taliyeyaasha Qaybaha, Saldhigyada, Kulliyadaha, Madaxda Hoggaamada Wasaaradda Gaashaandhigga iyo w.l.m. waa inay si degdeg ah ugu gudbiyaan Hay'adaha Garsoorka C.Q.S. ee khuseeya liiska dadka baxsaday ka hor taariikhda la faafiyey Xeerka la hadal hayo, ogeysiisna ku siiyaan Maxkamadda Sare ee C.Q.S., Xeer ilaaliyaha Guud ee C.Q.S., Hoggaanka Ciidanka iyo Hoggaanka Maamulka Lacagta oo ay askarta baxsiga ah ka tirsanyihiin;

2) Marka ay dhammaato muddada ku cayiman Qod. 1aad ee Xeerka Baxsiga iyo Hub ururinta. Madaxda ay dadka baxsadka ah ka tirsanyihiin waa inay u soo gudbiyaan Hayadaha Garsoorka C.Q.S. oo awoodda u leh qaadista dacwaddooda (Territorialmente competente). dadka iskood isu soo xaadiriyey, si looga jaro liiska kuwa harayna lagu tiriyo inay si buuxda u galeen dembiga baxsiga ah galdacwadeedkoodana laga furo Xariiska Xeeriiaaliyaha C.QS. ee khuseeya iyo Maxkamadda ku beegan:

3) Marka tebin Maxkamadeed laga sameynayo dadka baxsada kaddib markuu dhaqan galo Xeerka baxsiga ee kor ku tilmaaman, waxaa loo hoggaansanaanayaa Qod. 17aad X.H.C. oo lala akhriyo Qod, 1aad iyo 19aad ee X.H.C.C. ee Nabadda;

Qod. 4aad

BILLAABIDDA IYO HOR U WADIDA DACWADDA

(Inizio ed esercizio dell'azione penale)

1) Marka la billaabayo ama horo loo wadayo dacwooyinka ku shaqa leh Maxkamadaha Ciidammada ee Dagaalka waa in oggolaansho laga helaa Talive Ciidan, Qayb ama Taliyaha Gobolka ee Guulwadayaasha uu Degaankiisa Askariga ka tirsan yahay ama qof Sarkaal [illegible] ah oo u [illegible] wakiishay darajadiisana [illegible] G/le Sare;

2) Haddii uu eedeysanaha darajadiisa gaarsiisan yahay SAREEYE (Janan nooc kasta) dacwa qaadiddiisa waxaa fasaxaya Taliyaha ugu sareeya ee C.Q.S.

Qod. 5aad

HUB URURINTA

1) Guud ahaan xagga hub ururinta waxaa ka mas'uul ah Xoghayayaasha Gobollada. Degmooyinka

iyo Hay'adaha C.Q.S. ee u qaybsan xasilloonaanta iyo nabadgelyada gudaha, haddii ay u baahdaana, waxay la kaashanayaan Colalka X. D. Soomaaliyeed co ugu dhow;

2) Hay'adaha kor lagu soo sheegay waa in ay ugu tala galaan Talisyada Saldhigga Booliska meel lagu keydiyo hubka iyo saanadda la ururinayo ayagoo u sameyn doono diiwaano lagu muujinayo nooca hubka iyo saanadda, magaca saddexan iyo tilmaan buuxda ee nin-ka keenay ama lagu qabtay. lambarka iyo wixii tilmaan kale ah oo lagu garan karo hubkaas iyo saanaddaas, habka uu markii hore ku soo galay iyo taariikhda laga qabtay;

3) Diiwaankaas wuxuu noqon doonaa mid lagu hayo Saldhigyada Booliska ee Degmooyinka, kuwaasoo laga doonayo in ay hubka, saanadda, noocyada qalabka wax lagu qarxiyo iyo hubka kiimikada iyo bateriyolo-jikada oo ay ururiyeen ku wareejiyaan, maalin kasta, Talisyada tooska ugu sareeya, kuwaasoo ayagana isla markaas u gudbin doona Taliyaha Qaybta Xoogga Dal-ka Soomaaliyeed uu Degaankiisa ka tirsan yahay oo isagana isla markaas u gudbin doona Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

4) Marka Xeer Nidaamiyahaan loo eego, Saldhig-ga 43aad ee Kismaayo wuxuu la mid yahay Qayb X.D.S.;

5) Hubka laga ururinayo Gobollada Shabeelaha Dhexe, Banaadir iyo Shabeelaha Hoose waxay Taliye-yaasha Qaybta Booliska ee hubka maalin kasta ku soo ururayo waxay si toos ah u gudbinayaan Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

6) Ilaa iyo laga sameynayo sharciga hub haysa-shada, Xildhibaanada Golaha Shacbiga, mas'uuliyiinta sare ee Dawladda oo fasax u haysta hubka ay sitaan iyo rayidka kale oo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga horay ugu fasaxay hawl Qaran awgeed, waa inay ka

diiwaan geliyaan hubkooda, Saldhigyada Booliska ee Degmooyinkooda ku aadan, kaddibna nuqulka asaasiga (l'originale) ee fasaxa loo soo gudbiyaa Wasaaradda Gaashaandhigga si loogu xalaaleeyo.

Qod. 6aad

QABASHADA, XAFIDAADDA IYO BAARITAANKA HUBKA

Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga waxaa loo xilsaaray qabashada hubka ku soo ururayo, diiwaan-gelintiisa, kala saariddiisa iyo xafidaaddiisa, kaddibna baaritaan adag ku ameeyo, soona hubiyo lahaanshaha asalka ah ee hubkaas iyo habka uu ku soo galay waddanka J.D.S.

Qod. 7aad

AWOODDA QAADISTA DACWADAHA

1) Awoodda qaadista dacwadaha dembiyada la xiriira Xeerka lambarkiisu yahay 11 ee 20ka Maarso 1985 waxaa iska leh Maxkamadaha Ciidamada Qalabka Sida ee Dagaalka;

2) Ayadoo la tixgeliyey in J.D.S. ay dagaal kula jirto cadowga, oo sidaas darteedna la dhisay Maxkamadaha C.Q.S. ee Dagaalka, dembi kasta oo uu galo Militeri ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida awoodda dacwa qaadistiisana waxaa iska leh Maxkamadaha ku xusan xubinta hore ayadoo waafaqsan Qod. 54aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Ciidammada Dagaalka.

Qod. 8aad

DHAQAN GAL

Xeer Nidaamiyahan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka, waxana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16.4.1985

WASIIRKA WASAARADDA GAA/DHIGGA J.D.S.
(S/Guud Maxamed Cali Samantar)

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIGGA L. 6 ee 16 Abr. 1985, Magacaabid Kaaliye.

WASIIRKU

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida loo magacaabo Kaaliye Sharciyeysan;

MARKUU TIXGTLIYEY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee C.Q.Sida;

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad Xub. 5aad Nidaamka Garsoorka Ciidammada.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod 1aad

Xiddigle Cabdirashiid Ciise Cawaale oo ka tirsan Qaybta 21aad, waxaa loo magacaabay Kaaliyaha Maxkamadda Dagaalka C.Q.S. ee Qaybta 21aad.

Qod. 2aad

Go'aankani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxana lagu soo saarayaa Faafinta Ramiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16.4.1985

WASIIRKA WASAARADDA GAA/DHIGGA
(S/Guud Maxamed Cali Samantar)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: Baafin Jeegag Lumay.

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee lumay;

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka;

HADUU ARKAY: Qod. 69,(9-65 N. 2, Lumid Jeegagga Wareega J.W. Lr. 499880 20,000/= J/W Lr, 409881 20,000/— J/W Lr. 49882 20,000/= J/W Lr, 409883 20,000/= J/W Lr. 409884 20,000/= J/W Lr. 409885 20,000/= J/W Lr. 409886 20,000/= J/W Lr. 409887 20,000/= J/W Lr. 409888 20,000/=, kuna qoran Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale.

WUXUU XEERIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeegaggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale markii ay ka soo wareegto mudada 20 maalmood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 23.9.1984

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer
(Dr. Cab/raxmaan Sh. Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Xaliimo X. Cabdi Aadan)